



## PreK 4 ME Family Links


### CUTUBKA 1: QOYSKA

#### Dulmarka Cutubka 1: Qoyska

Waxbarashadeena bishaan waxay dulmaraysaa qoysaska ardaydeena, iyo sida xubnaha qoysku ula xariiraan ayna isku caawiyaan. Intaan ku jirno waxbarashadeena, waxaan baranaynaa sida qoysasku uga wada shaqeeyaan xalinta caqabadaha, rabshadaha iyo dhibaatooyinka, waxaana wax ka baran doontaa masuuliyadaha iyo doorarka faraha badan ee qoysaska. Waxaan sidoo kale ka shaqayn doonaa abuurista xirfadaha aasaasiga ah ee ku xeeran xarfaha iyo dhawaaqyada ay sameeyaan. Waxaan tijaabinaynaa fikradaha kaladuwaa ee ardaydeena isku fasalka ah iyo sida loo xaliyo caqabadaha ka jira ardayda fasalka dhexdooda.

Akhri si aad u aragto waxa ka socda fasalkeeda PreK una keen waxbarashadaan guriga carruurtaada!

#### BUGAAGTA MURAAJACADA EE CUTUBKA 1




Peter's Chair

Oo ay qortay Ezra Jack Keates




The Hello, Goodbye Window

Oo ay qoreen Norton Juster iyo Chris Raschka



Time for Bed

Oo uu qoray Mem Fox



Families

Oo ay qortay Shelley Rotner iyo Sheila M. Kelly

Sawiro lagasoo qaaday Amazon.com

#### Ciwaannada kale ee aan akhrinayno:

Cry Baby waxaa qoray: Karen Beaumont

Sometimes I am Bambaloo

Waxaa qoray: Rachel Vail

Corduroy waxaa qoray: Don Freeman

A Pig is Big oo uu qoray: Douglas Florian

Shoes, Shoes, Shoes

Waxaa qoray: Ann Morris

#### Heesaha, Ciyaarta Erayga iyo Xarfaha

Kani waa waqtiga maalinta ee aan waxbarashada kusiino ardaydeena nashaadaad baashaal ah ayagoo dhamaantood wadajira. Waxaan bilaabaynaa tirinta... oon ku bilaabayno raha:

5 rah oo Midab Cagaar Ifaaya leh

5 rah oo Midab Cagaar Ifaaya leh, oo ku fadhiya looxaan qurxoon, oo cunaaya qaar kamid ah cayayaanka ugu macaan.. YUM! YUM!!

Mid ayaa ku booday barkada, oo ay biyo qaboow oo raaxo leh ku jiraan, hadda waxaa meeshii u haray 4 rah oo cagaaran.. GLUB! GLUB!

4 rah oo Midab Cagaar Ifaaya leh, oo ku fadhiya looxaan qurxoon, oo cunaaya qaar kamid ah cayayaanka ugu macaan.. YUM! YUM!!

Mid ayaa ku booday barkada, oo ay biyo qaboow oo raaxo leh ku jiraan, hadda waxaa meeshii u haray 3 rah oo cagaaran.. GLUB! GLUB!

3 rah oo Midab Cagaar Ifaaya leh, oo ku fadhiya looxaan qurxoon, oo cunaaya qaar kamid ah cayayaanka ugu macaan.. YUM! YUM!!

Mid ayaa ku booday barkada, oo ay biyo qaboow oo raaxo leh ku jiraan, hadda waxaa meeshii u haray 2 rah oo cagaaran.. GLUB! GLUB!

2 rah oo Midab Cagaar Ifaaya leh, oo ku fadhiya looxaan qurxoon, oo cunaaya qaar kamid ah cayayaanka ugu macaan.. YUM! YUM!!

Mid ayaa ku booday barkada, oo ay biyo qaboow oo raaxo leh ku jiraan, hadda waxaa meeshii u haray kaliya 1 rah oo cagaaran.. GLUB! GLUB!

1 rah oo Midab Cagaar Ifaaya leh, oo ku fadhiya looxaan qurxoon, oo cunaaya qaar kamid ah cayayaanka ugu macaan.. YUM! YUM!!

Mid ayaa ku booday barkada, oo ay biyo qaboow oo raaxo leh ku jiraan, hadda waxaa meeshii kuma harin (o) wax rah ah oo cagaaran.. GLUB! GLUB!

**Arag bogga kale si aad u aragto nashaadaadka guriga**



# Waxbarashada leh Nashaadaadka Dheeraadka ah Gee Guriga!

<p><b>Nashaadadaan waxay taageeraysaa Heerarkeena Luuqada, Dareenka Bulshanimada iyo Cilmiga Bulshada</b></p> <p><b><u>Sawirada Qoyska</u></b></p> <p>Haddii aad haysato albamka sawirada qoyska—la firi sawirada cunugaaga. Ka hadal dadka ku jira sawirada, xariirada iyo xasuusaha.</p>	<p><b>Nashaadadaan waxay taageeraysaa Heerarkeena Fanka iyo Hal Abuurka Farshaxanka</b></p> <p><b><u>Waxay Ku bilaabataa</u></b></p> <p>Waydii cunugaaga inuu heli karo sadex waxyaabood oo guriga yaala kuwaas oo ku biloowda isla dhaawaqa magacooda, kadibna u sheeg ilmaha inuu sawiro sawirada alaabaha.</p>	<p><b>Nashaadadaan waxay taageeraysaa heerarkeena Xisaabta</b></p> <p><b><u>Raadinta Xisaabta</u></b></p> <p>Waxaan samaynaynaa raadinta kaydka xisaabta! Kala sahqee ilmahaaga helitaanka 2 ama 3 sheey oo isku mid ah oo guriga yaala (laba qalin qori, laba furka dhalada, iwm.). U sheeg ilmahaaga inuu saf taxan gasho ama koolo kula dhajiyo xaashi. Ka codso inuu alaabaha tiriyo.</p>
--	---	---

## *Tilmaamo ku aadan xiliga sheekada aad la samaynayso ilmahaaga:*

- ⇒ Fariista meel raaxo iyo daganaansho leh, oo aan cidna idin carqaladayn doonin
- ⇒ Intaad akhriska wado, tusi ilmahaaga erayga adoo la raacaaya fartaada
- ⇒ Qeex erayo cusub ama erayo waawayn intaad hawsha wadaan



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

## Kalmad ku socota Qoysaskeena iyo Daryeelayaasheena:

Dhammaan heirarka kobaca ee ilmahaaga yar, waa muhiim inaad ka warhayso shaqooyinkiisa waxbarashada dhammaan maalinta. Waalidiinta shaqeeya, arintaan ayaa badanaa ah mid adag laakiin waxaa lagu fududeeyaa wada sheekaysiga furan ee ay la sameeyaan kuwa daryeela ee waxbara ilmahaaga. Xaqijiij in daryelahaagu xog cusub ka hayo sida laguulasoo xariiraayo. La hadal daryelaha sida ugu badan ee macquulka, xataa maalin kasta, si aad ula socoto waxa ilmahaagu uu baranaayo iyo sida ay uu u dhaqmaayo. Ku taageer waxa ilmuu ka barato xarunta barbarinta ama daryelka maalintii nashaadaadka aad adigga iyo ilmahaagu ku samaysaan guriga. Noocaan wada xariirka aad la samayso daryeelayaasha iyo macalimiinta ayaan kaliya caawinayn kobaca aqoonta, bulshanimada iyo dareenka cunugaaga, waxay sidoo kale ka caawinaysaa ilmahaaga inay dareento inay kugu tiirsan tahay.

Xasuusnoow in xariir kasta oo aad la samayso ilmahaaga ay khibrad waxbarasho u tahay ayna waxbarashadu ku timaado meel badan oon ahayn dugsiga.